Tusmada anshaxa hab-dhaqanka

apogee enterprises, inc.

Guddiga U Hoggaansanaanta Shirkadda — Agoosto 2011

Joe Puishys • Jim Porter • Pat Beithon • Warren Planitzer

Haddaanu nahay Shirkadda Apogee, Waxaan ganacsiga u fulinaa heerka ugu sarreeya ee daacadnimada iyo akhlaaqda la xiriirta anshaxa. Waxaa intaa dheer, sharciyada iyo xeerarka ka jira Mareykanka iyo wadamada dibadda ah in ay si aad ah u dalbanayaan in shirkadaha fiiro gaar ah u yeeshaan waxqabadkooda si loo hubiyo inay ku dhaqmayaan sharciyada iyo xeerarka iyaga khuseeya. Si shaqaalaha looga caawiyo inay fahmaan waxa laga rajaynaayo si ay waajibaadkooda u gutaan,waxay shirkadda abuurtay Barnaamijka Ku-Camal-Falka (Company-wide Compliance Program) ee Shirkadda oo dhan khuseeya oo ka kooban Tusiyahan; Xeerka Anshaxa iyo Hab-dhaqanka Ganacsiga (Code of Business Ethics and Conduct) kaas oo aasaasa heerarka iyo qaanuunada anshaxa la xiriira ee hagga Shirkadda; iyo Qawaaniinta shirkadda (Corporate Policies) oo koobaya xeerarka ku-camal-falka qeexan oo laga doonayo in dhammaan shaqaalaha ay ku dhaqmaan.

Dhammaan shaqaalaha waxaa ay mas'uul ka yihiin in ay u hoggaansamaan dhammaan shuruucda, heerarka iyo mabaadiida ku qoran ama laga soo tixraacay Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee, Anshaxa Hab-dhaqanka Ganacsi, iyo Qawaaniinta Shirkadda. Qawaaniinta Shirkadda waxaa loo adeegsan karaa dhammaan shaqalaha Shirkadda, oo ay ku jiraan shaqaalaha Apogee iyo shaqaalaha laamaha, qeybaha, unugyada, Apogee hoos yimaada. Marka laga reebo shuruucda shirkadda ee khilaafsan Sharciga Shirkadda ama kuwo kale oo heshiis lagu wada galay ama waajibaadka kale ee Shirkadda ka saaran sharciga lugu dabakhi karo.

Ku xadgudbka sharciga, ama Barnaamijka lagu Dhaqmo ama Qawaaniinta kale ee Shirkada, hab-raacyada, tilmaan-bixino, sharciyada shaqada iyo wixii la mid ah waxay horseedi karaan tallaabo anshax ah oo ka mid noqon karta in shaqada laga eryo. Waxyaabaha ku qoran Tusmadan, Anshaxa Hab-dhaqanka Ganacsi, Qawaaniinta Shirkadda ama Is-gaarsiinta Barnaamijka lagu dhaqmo kale,midkoodna kama hadla caqdi ama qandaraas shaqo siin ah.

Si looga caawiyo shaqaalaha fahamka shuruucda iyo qawaaniinta ee saameeya Shirkadda, waxaa la soo sameeyay Qawaaniinta Shirkadda ee soo socda oo kooban. Haddaba shaqaalaha waxaa laga doonaya in ay bartaan shuruucda iyo qawaaniinta lagu dabakhi karo shaqadooda. Nuqulo ah Anshaxa Hab-dhaqanka Ganacsi, Qawaaniinta Shirkadda iyo Qawaaniinta kale ee shirkadda waxay diyaar u yihiin shaqaalaha si ay u muraajaceeyaan. Halkan waxaa lagu soo gudbinayaa Barnaamijka Qawaaniinta Shirkadda Lagu Dhaqmo oo kooban si ay kuugu fududaato fahamkiisa. Haddii ay jirto xaalad aan looga hadlin halkan waa arrin laga yaabo in aan la aqbali karin ama la aqbali karo labadaba. Haddii aad qabtid wax su' aalo ah, kala xiriir horjoogahaaga, Waaxdaada Shaqaalaha, ama Qareenka Guud ee Apogee ama xubin ka mid ah Guddiga U Hoggaansanaanta Shirkadda ee ku sugan xafiiska shirkadda Apogee ee laga helo cinwaanka iyo lambarada taleefoon ee lagu xusay hoosta “Soo sheegidda iyo Baarista Xadgudubyadda.”

Xusuusnow, in Shirkadda Apogee ay isku haleynayso taageeradaada si ay u fulaan balanqaadkeena ah in la fuliyo mabaadiideena akhlaaqeed, qaanuunka, iyo hab-xisaabeed habboon iyo xisaab hubin fiican.

Khadka Taleefoonka Hab-dhaqameedka Apogee

www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee). (caalamkoo-dhan) ama 800-441-6164 (taleefoon lacag la'aan gudaha Mareykanka ah). Fadlan ka eeg tilmaan-bixinada ah sida Baraasil looga soo waco taleefoonka bilaashka ah ee khadka Hab-Dhaqameedka Apogee bogga ugu danbeeya Tusmadan ama www.guideline.lrn.com (geli magacaururka Apogee).

Soo sheegidda iyo Baarista Xadgudubyada

Haddii aad rumaysan tahay inay jirto cid ku xad-gudbaysa sharciga, mabaadiida ama xeerarka Tusiyahan ku jira, Xeerarka Anshaxa iyo Hab-dhaqanka Ganacsiga amaba aad qabto dareen ku saabsan hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jiro, waxaa lagaa doonayaa inaad ka soo war-bixisid xad-gudubka runta ah ee jira ama kan aad tuhuntay ama dareenka ku galay. Waxaad u sheegi kartaa wixii xad-gudub ama dareenkaaga ah horjoogahaaga tooska ah (immediate supervisor), maamule sare, waaxdaada arrimaha shaqaalaha, Qareenka Guud ee Apogee oo lambarkiisu yahay 952-487-7514, xubin ka tirsan Guddiga ku Camal-falka Xeerarka ee Apogee lambarkiisu yahay 952-835-1874, amaba waxaad xaashi intaad qorto u diri kartaa qareenka guud ee Apogee oo cinwaankiisu yahay 4400 West 78th Street, Suite 520, Minneapolis, Minnesota, USA 55435. Waxaad kaloo si qarsoodi ah ugu la soo xiriiri kartaa Khadka Hab-Dhaqameedka Apogee www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee). (caalamkoo-dhan) ama 800-441-6164 (taleefoon lacag la'aan gudaha Mareykanka ah.). Fadlan ka eeg tilmaan-bixinada ah sida Baraasil looga soo waco taleefoonka bilaashka ah ee khadka Hab-Dhaqameedka Apogee bogga ugu danbeeya Tusmadan ama www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee). Khadka Taleefoonka Hab-dhaqameedka Apogee waxaa maamula shirkad ka baxsan Apogee oo aan wax xiriir ah la lahayn Apogee.

War-bixin kasta oo ku saabsan ku xadgudub la ogyahay inuu dhacay ama mid la tuhunsanyahay inuu jiro oo ah qaanuunka ama Barnaamijka Lagu Dhaqmo ama hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jira si deg-deg ah ayaa gebi ahaan loo baarayaa.

Tusmada anshaxa hab-dhaqanka

Qawaaniinta Shirkadda	Qawaaniinta oo Kooban	U Kuur Gal
Sharciga ka soo horjeeda aaminaada iyo dhaqamo lagu tartamayo	Shirkadda waa ka mamnuuc inay kula heshiiso ama isfaham kula yeelato shirkadaha baratamayaasheda ah in beec loo gooyo in la farageliyo qiimaha badeecadda iyo adeegga, beecdhinka, xaladaha kale ee la xirrira beeca, faa'iidooyinka ama faa'iido dheeraad ah, qiimaha ku kaca, u qoondayn gobolo ama macmiil, ama qiime lagu tartamo. Shirkadda kama xayuubin karto dadka sii gada ama qeybiya badeecada shirkadda soo saarto xoriyadooda inay dib u sii gadaan badeecada shirkadda soo saarto.	Wadahadallo lala yeesho kuwa baratanka kula jira shirkadda oo ku saabsan qiimaha, xeeladaha qiimeynta, suuq geynta, badeeco iyo adeeg aan hore loogu dhawaqin, dakhli iyo kharash ama warar kale oo ku saabsan hantida shirkadda.
Sharciyada iyo qawaaniinta ka soo horjeeda cunaqabateynta	Shirkadda khasab kuma aha inay fuliso ama taageerto cuna-qabateyn ganacsi oo Mareykanka aan taageerin oo lagu soo rogay waddan.	Ka jawaabista codsi cuna qabateyn. Codsiga taageeridda cunaqabateynta Carabta ku soo rogtay Israel.
Iskahorimaadka danaha	Shaqaalaha waa inay iska ilaaliyaan xaaladaha iyo falalka keeni karo in dantooda ka hor timaado, ama si macquul ah ugu muuqato in ay ka hor imaanayso, danaha shirkadda. Shaqaalaha qaar waxaa laga doonayaa in ay buuxiyan xog ururin ku saabsan iska hor imaadka danaha.	Ka helidda hadiyado xad-dhaaf ah , ixsaanfal iyo madadaalin kuwa alaabta u keena shirkadda iyo macmiisha hada la joogo ama la filiyo. Ka la haanshaha dano dhaqaale ku lug leh baratamayaasha, kuwa alaabta u keena shirkadda iyo macmiil.
Hadiyado iyo waxyaabo Bilaash ah	Shaqaalaha ma siin karaan mana ka qaadan karaan hadiyad ama wax bilaash ah qof ama shirkad doonaysa howl ganacsi in ay la yeelato shirkadda, wax la xiriira macaamil-ganacsi oo shirkadda ku lug leh. Hadiyadaha iyo waxyaabaha bilaashka ah ee aan la xiririn macaamil ganacsi waa la qaadan karaa haddii aysan lahayn qiime aad u sarreeya oo aan ka badneyn waxa sida caadiga la isa siiyo.	Hadiyadaha iyo waxa bilaashka ah oo qiimaha caadiga ah ka sarreeya oo shaqaale siiyo, ama shaqaale ka qaato kuwa shirkadda alaab u keena, macmiil, shirkad qaybiye ah ama talo bixiyeyaasha. Siinta lacag, ama ka qaadashada lacag, kuwa shirkadda alaab u keena, macmiil, shirkad qaybiye ah ama talo bixiyeyaasha ayadoon la tixgelinayn inta ay la'egtahay.
Xiriirka dowladda– La macaamiilka Saraakiisha Dowladda iyo Shaqaalaha	Lacag siin, hadiyado, cunto iyo waxyaabaha kale ee bilaashka ah ee loola jeedo in la soo jiito sarkaal dowladeed, ama qof u shaqeeya dowladda waa mamnuuc. Shaqada loogu yabooho saraakiisha dowladda ama shaqaale waa inuu marka hore soo oggolaadaa Qareenka Guud ee Apogee. Shaqaalaha waa in aysan been sheegin ama yayasan runta baddelin marka ay la hadalayaan saraakiisha dawladda ama shaqaalaha.	Lacag, hadiyado, waxyaabo bilaash ah. madadaalo loo sameeyo saraakiil dowladeed ama shaqaale, in dad lagu shaqaaleeyo codsiga sarkaal dawladeed ama shaqaale. Khalad u fasirid ama war-bixin muhiim ah oo kas looga tagey in lagu daro wada hadalada lala yeelanayo saraakiisha dowladda ama shaqaale.
Qandaraasyada Dowladda	Sharciga iyo qawaaniinta khuseysa qandaraasyada dowladda in si adag loogu dhaqmo waa waajib saaran dhammaan shaqaalaha.	Hadiyadaha ama laaluushka la siiyo saraakiisha qandaraaska. Wada hadal ku saabsan fursadooyin shaqo mustaqbalka ah laga siiyo saraakiisha qandaraaska Shirkadda. Raacid la'aanta hab-raaca habboon ee hab-xisaabeedka qandaraaska ama shuruudaha qandaraaska.

Tusmada anshaxa hab-dhaqanka

Qawaaniinta Shirkadda	Qawaaniinta oo Kooban	U Kuur Gal
Baaritaanada iyo Kullanada Waraysiga Dowladda	Dhammaan codsiyada dowladda ee ah kullanada waraysi iyo dokumeentiyadda waa in si deg-deg loogu soo gudbiyo Qareenka Guud ee Apogee. Shaqalaaha ka qayb qaata kullanada waraysi ee dowladda waa inay jawaabo sax ah oo dhamystiran bixiyaan.	Warqad u fasaxeysa baaris, yeeris maxkamad, codsi war-bixin oo ka yimid baarayaal ama hawl-wadeeno dowladeed oo ku saabsan shirkadda ama Shirkado ay la leedahay qanacsi.
Macaamilada ganacsi iyo Hawl-galada Caalamiga ah	Shirkadda waxay fulinaysaa dhammaan shuruucda iyo shuruudaha laga rabo ee ku saabsan macaamilada ganacsi caalamiga ah waxaa intaas u dheer u hoggaansanaanta shuruucda Mareykanka lagu dhaqmo.	Fulin la'aan shuruudaha khuseeya sarifka, dhoofinta, soo dejinta, ama canshuuraha laga rabo wadan dibadda ah ama xakameyn dhoofin, meelaha ay ka jirto xayiraad ganacsi iyo sharciyada Mareykanka ee diidan cunaqabateynta.
Sharciga Musuqmaasuqa shisheeyaha	Waa mamnuuc in si sharci darro ah loo siyo lacago iyo hadiyado saraakiiil ka tirsan dowladdo shisheeye, siyaasiyiinta iyo axsaab siyaasadeed.	Lacago la bixiyey shaki ku jiro, hawl-fududeyn, hadiyado ama siinta lacag caddaan saraakiisha dowlad shisheeye, siyaasiyiin ama axsaab siyaasadeed. Waxqabadyadda wadan laaluush lagu ogyahay. Dallaacad aan caadi ahayn oo weyn ama yar, gunnooyin ama lacag-celis.
Laluush iyo hawl-fududeyn	Laluush iyo hawl fududayn waa mamnuuc.	Lacag bixin aan caddayn sababta loo bixiyey, dallacaad iyo latashi la qorsheeyey, ama hadiyado badan ama xad-dhaaf ah.
Dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed iyo qalqaalin	Shirkadda waxay fulinaysaa dhammaan shuruucda ku saabsan lacagta lagu bixiyo qaab siyaasadeed iyo qalqaalo ugu jirid.	Deeq siyaasadeed oo laga bixiyo sanduuqa deeqda Shirkadda . U magdhabida shirkadda ay ku bixiso deeq siyaasad shaqsiyadeeed.
Xafidaada Hantida iyo Xogta Shirkadda	Xogta ku jirta diiwanada shirkadda ama ay abuurto shirkadda waa hantida shirkadda. Hantidan ah halabuurka iyo xogta iyo maalidda Shirkadda iyo hantida waa in si haboon loo xafido si looga hortago xatooyada, burburin ama shaacinta iyo isticmaalidda aan ruqsadda loo haysan.	Isticmaalka iyo shaacinta xogta milkiyada, xuquuqda hal-abuurka ama sooftweerka kumbuyutarka oo ay shirkadda leedayay. Shirkadda lacagteeda oo si aan munaasab ahayn loo isticmaalo. Hantida shirkadda oo dano gaar ah loo adeegsado.
Fursado Shaqo oo is la'eg	Shirkadda waxay bixinaysaa fursad shaqo bixin oo siman ayadoon la eegaynin jinsiyad, midab, caqiido, diin, abtirsi, lab/dheddig, da'a, jinsiyada asalka, dooqa isutagga, lixaad-dhimman, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, dagaal soo galay, ama xaalada dabaqada kale ee la dhawro.	Tallaabo laga qaaday shaqaale oo ku salaysan dhalasho, midab, caqiido, diin, abtirsi, lab/dheddig, da'a, jinsiyad, dooqa isutagga, lixaad-dhimman, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, dagaal soo galay, ama xaalada dabaqad kale ee la dhawro.

Tusmada anshaxa hab-dhaqanka

Qawaaniinta Shirkadda	Qawaaniinta oo Kooban	U Kuur Gal
Dhibaatayn	Dhibaateyn galmo la xiriira iyo dhibaateyn ku salaysan jinsiyad, midab, diin, lab/dheddig, da'a, abtirsi, jinsiyad asalka, lixaad-dhimman, dooqa isutagga,xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, dagaal soo galay, ama xaalada dabaqad kale ee la dhawro lama oggola umana dulqaadanayso shirkadda.	Taabasho aan la rabin, soo-jeedin faallo ama kaftan, xaqiraad dumar ama ka hadlid dooqa isutagg ama dhibaateyn uu sameeyo ama lagu sameeyo shaqaalaha, macmiil ama kuwo kale. Dhibaateyn ku salaysan xaalad dabaqad kale ee la dhawro oo lagu dhaqmo. Hanjabaad ama hadallo-sarbeed la xiriira u hoggaansanaanta, ama diidmada shaqaale shukaansiga waxaa uu saameynayaa xaaladihiisa/xaaladeheeda shaqo.
Sharciyada iyo Xeerka La Xiriira Bey'ada	Shirkadda waxay fulinaysa sharciyada iyo xeerarka u degsan bey'ada.	Diwaan-gelin aan dhammeystirnayn oo ku saabsan bey'ada. Wax qubtay ama meel ku daatay oo aan la soo sheegin. Qashinka oo hab munaasab ah aan lo tuurin. Qashin qub iyo qashin qaad aan amar loo haysan oo la isticmaalo.
Xog-ogaal ka ganacsi iyo xogta ganacsiga hoos looga sheego	Shaqalaha ma gadan karaan mana iibin karaan saamiyada iyo hantida Apogee marka ay ogyihiin "xog" aan la shaacin ama Xogna ma siin karaan dad gadanaya ama ka ganacsanaya saamiyada iyo hantida Apogee. Shaqaale kama qayb qaadan karo fulin heshiis kala gadasho oo la xiriira saamiyada iyo hantida Apogee.	Ka ganacsi, ama xog hoose siin dad kale, xogtaas oo ku saleysan xog aysan ogeyn dadweynaha. Ka ganacsiga saamiyada iyo hantida shirkad dadweyne kale taas oo laga yaabo in Apogee ay la leedahay howlo ganacsi. Gadida ama soo gadashada qandaraasyo horey loo soo gubdiyay, caddaalad kala baddalasho, qabashadda iyo is-dhaafi deeq lacageed oo loogu tala galay in lagaga hortago khasaare ama hoos u dhac qiimeha suuqa ku yimaada saamiga iyo hantida Apogee.
Diiwaan-gelin iyo xoghayn sax ah	War-bixinta ku saabsan heerka dhaqaale ee shirkadda, diiwaanada iyo wixii dukumeenti ah oo loo diro dad kale waa inay ahaadan kuwo dhammaystiran oo sax ah, waana in loo diyaariyaa hab waafaqsan mabaadiida guud ee hab-xisaabeedka iyo sida gaarka ah ay shairkadda ay u rabto.	Diinwaan-gelino khalad ah, marin-habaabsan ama mid laga tagay. Raacid la'aanta hab-raac hab-xisaabeed habboon, ama isticmaalka xisaabin lacag oo ka madax-banaan buug gelinta. Ka tir-tirida diiwaan-gelinta shirkada xaqiiqda shay ama xog loogu baahan yahay sharciga ama aasaasi u ah in diiwaan-gelinta aan noqon mid marin-habaabsan.
Is-gaarsiinta iyo Xogta Elekteroonikada ah	Dhammaan qalabka is-gaarsiinta iyo elekterooniga waxaa iska leh shirkadda waxaana loogu tala galay in shirkadda loogu shaqeeyo. Shirkadda waxay xaq u leedahay in ay fatashto ama ilaaliso sida loo isticmaalo qalabyadda iyo waxyabaha ku keydsan is-gaarsiinta shakhsi iyo faylasha.	Qalabka shirkadda oo loo isticlmaalo si loo helo, lagu diro ama lagu soo diro wax dad lagu dhibaateynayo,waxyaabo sharci darro ah, qaawini cad ama fisqi ah. Isticmaal shakhsi oo xad dhaaf ah.
In loo bandhigo macluumaad dadweynaha, warbaahinta iyo shaandheeyeyaal	Soo bandhigidda macluumaadka ku saabsan shirkadda waxaa kaliya la sameyn karaa ayada oo loo marayo afhayeen ku magacaaban oo ruqsad u haysta.	Ku soo bandhigidda macluumaad Been ah ama mid marin-habaabsan war tebinada ama xog waran loo gudbiyo dowladda ama hay'adaha wax nidaamiya. U soo bandhigidda macluumaadka shirkadda oo qarsoodida (sirta) ah dadweynaha. Shaqaalaha oo aan ruqsada u haysan ama aan ahayn af-hayeenada ku magacaaban in ay la hadlan warbaahinta ama shaandheeyeyaal ayagoo matalaya Shirkadda.

Tusmada anshaxa hab-dhaqanka

Qawaaniinta Shirkadda	Qawaaniinta oo Kooban	U Kuur Gal
Anshax marinta Iyo shaqo ka eryidda shaqaalaha	Shirkadda waxay xaq u leedahay inay anshax mariso ama ay shaqadda ka joojiso shaqaale kasta iyo in ay go'aamiso anshaxa gaar ah oo ay ku fulinayso dacwad kasta.	Isku dayo lagu xadiddayo anshax marinta ayaa laga yaabaa in ay shirkadda fuliso.
Dadka wax soo ka shifa	Shaqaalaha u soo sheega xadgudub sharci oo shaki laga qabo si daacad ah, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ama Qawaaniinta Shirkadda ee Apogee ama arrin la xiriirta hab-xisaabeed ama xisaab hubin shaki ku jiro lagu ma sameyn karo ciqaab aargoosi ah. Shaqaalaha waxaa laga rabaa in ay soo gudbiyaan wixii xadgudub jira ama la tuhunsanyahay inuu jiro oo ku saabsan jebinta sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ama Qawaniinta Shirkadda ee Apogee.	Wixii hanjabaadyo ama cagajugleyn ah ee loo geysto shaqaalihii soo kashifay ku xadgudubka jira ama la tuhunsanyahay inu jiro oo ku saabsan jebinta sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee ama Qawaaniinta Shirkadda ama uu qabo dareen ku saabsan hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jiro.
Hirgelinta Barnaamijka Lagu Dhaqmo iyo Turjumaada	Guddiga Barnaamijka Lagu Dhaqmo ayaa mas'uul ka ah dhaqan gelinta iyo ilaalinta Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee.	Dadaalka iska indho tirka iyo "ka wareegasho" lagu sameeyo sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee ama Qawaaniinta Shirkadda.
Dabagalka iyo ilaalinta Barnaamijka Lagu Dhaqmo	Shaqaalaha waa inay raacaan Qawaaniinta Shirkadda, soona sheegaan wixii xadgudub ah gacanna siyaan dadaalka shirkadda ah inay uruuriso xogta ku saabsan Ku Dhaqanka.	Codsiyada ah "iska dhaga tirida" ama "iska ilowida" marka khuseyn ah ku dhaqanka, hab-xisaabeedka ama xisaab hubinta la soo qaado. Soo sheegid La'aanta xadgudub la xirrira sharciga ama Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee ama Qawaaniinta Shirkadda ama aad qabto dareen ku saabsan hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jiro.
Anshax marinta la Xiriirta Barnaamijmka Lagu Dhaqmo	Shaqaalihii ku xadgudba sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ama Qawaaniita Shirkadda Apogee waxaa lagu qaadayaa tallaabo anshax oo ku habboon.	Anshax marin la'aanta shaqaalaha ku xadgudba sharciga ama Barnaamijka Lagu Dhaqmo.
Aqoon iyo Xaqiijin Ku saabsan Barnaamijka Lagu Dhaqmo	Shaqaalaha waxaa laga doonayaa inuu u muraajaceeyo si wareegto ah Tusmada Barnaamijka Lagu Dhaqmo, inay xaqiijiyan fahanka ay u leeyihin wajibaadkooda ah in ay adeecaan shuruucda iyo hab-dhaqanka Apogee.	Xaqiijin la'aanta ku dhaqanka Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee. Ka qayb gal la'aanta Tababarka lagu dhaqmo.
Soo sheegidda iyo Baarista Xadgudubyadda	Shaqaalaha waxaa laga doonayaa in si deg-deg u soo sheegaan dhammaan wixii xadgudubyo jira ama la tuhunsanyahay inay jiraan oo ku saabsan jebinta sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ama Qawaniinta Shirkadda ee Apogee.	War-bixinta waa in si daacad ah loo soo gudbiyaa. Shaqsiyaad ku habboon ayaa loo xilsarayaa baarista. War-bixinta waxaa loo samayn karaa si qarsoodi ah. War-bixinada loo soo gudbiyo si aan daacadnimo ahayn looma dulqaadanayo.

Waajibka Kaa Saaran Ku Dhaqanka

Dhammaan shaqaalaha iyo shaqaalaha shirkadaha , faracyada, qaybta suuq-geynta, xubin ama rug ganacsi ee hoos yimaada Apogee waxaa laga filayaa inay ku dhaqmaan qawaaniinta iyaga khuseeya, xeerarka, sharciyada iyo awaamirta nidaaminta. Waxaa xil kaa saaran barashada cilmiga ku habboon gudashada waajibaadkaada si ay awood kuugu siiyaan inaad garatid arimaha ku dhaqanka suuroobi kara. Cudurdaar ma u sameyn kartid falida wax aan sharci ahayn amaba ka baxsan anshaxa shaqada adigoo ku andacoonaya in aadan garanaynin in falka aanay ahayn wax habboon.

Mas'uuliyada Maamul ee Ku Dhaqanka

Dhammaan xubnaha maamulka waxaa laga doonaya inay ku camal-falaan Barnaamijka Ku Camal-falka ee Apogee iyo Qawaaniinta shirkadda. Maamulka shirkadda waxay mas'uul ka yihiin xaqiijinta in aad heshid xog kugu filan iyo tilmaan-bixin awood kuu siinaya in aad fahantid iyo ku camal falka sharciga lagu dhaqmo iyo anshaxa loo baahan yahay. Horjoogeyaasha iyo maamuleyaasha waxay sidoo kale mas'uul ka yihiin si firfircoon u dhiiri gelinta shaqaalaha in ay codkooda ka dhiibtaan khuseyntooda, su'aalooyin iyo arimaha la xiriira sharciga iyo anshaxa lagu dhaqmo, iyo arrimo hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jira.

Soo sheegidda iyo Baarista Xadgudubyadda

Shirkadda waxay ku dhiirigelinaysaa shaqaalaheeda in ay si daacad ah u soo sheegan xadgudubyada macquulka ah ama arrimaha hab-xisaabeedka iyo xisaab hubinta shakiga ku jira. Haddii aad rumaysan tahay inay jirto cid ku xad-gudbaysa sharciga, mabaadiida ama xeerarka Tusiyahan ku jira ama siyaasada shirkadda ee lagu dhaqmo amaba aad qabto dareen ku saabsan hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jiro, waxaa lagaa doonayaa inaad ka soo warbixisid xad-gudubka runta ah ee jira ama kan aad tuhuntay ama dareenka ku galay. Waxaad ashatako ku soo gudbin kartaa:

1. Adigoo la xiriira horjoogahaaga tooska ah (immediate supervisor), maamule sare, waaxda arrimaha shaqaalaha, Qareenka Guud ee Apogee oo lambarkiisu yahay 952-487-7514 amaba xubin ka tirsan Guddiga ku Camal-falka Xeerarka ee Apogee oo aad ka soo wici karto 952-835-1874;
2. Waxaad waraaq intaad qorto u diri kartaa qareenka guud ee Apogee oo cinwaankiisu yahay 4400 West 78th Street, Suite 520, Minneapolis, Minnesota, USA 55435; ama
3. Adigoo si qarsoodi ah ula soo xiriira khadka Hab-Dhaqameedka Apogee (Apogee Code of Conduct) oo ah:
   · www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka ee Apogee)(caalamkoo-dhan)
   · 800-441-6164 (taleefoonka bilaashka Mareykanka gudihiisa)
   · Eeg tilmaan-bixinada ah sida Baraasil loogu soo waco taleefoonka bilaashka ah.

Khadka Taleefoonka Hab-dhaqameedka Apogee waxaa maamula shirkad ka baxsan Apogee oo aan wax xiriir ah la lahayn Apogee. Haddii aad rabto inaad war-bixin ku gudbiso af aan ahayn af-Ingiriisi, waa inaad wacdaa khadka Hab-Dhaqameedka Apogee oo aadna codsataa turjumaan.

War-bixin kasta oo ku saabsan ku xadgudub la ogyahay inuu dhacay ama mid la tuhunsanyahay inuu jiro oo ah qaanuunka ama Barnaamijka Lagu Dhaqmo ama hab-xisaabeed iyo xisaab hubin shaki ku jira si deg-deg ah ayaa gebi ahaan loo baarayaa. Haddii uu xadgudubka dhacay, Apogee waxay qaadaysaa tallaabo macquul ah si ay ugu hor tagto xadgudubyo lamid ah. Waxaa intaa dheer, soo sheegida arrimo ku saabsan hab-xisaabeed ama xisaab hubin waxaa loo soo sheegayaa guddiga xisaab hubinta ee golaha agaasimeyaasha Apogee. Xusuusnow, soo sheegid la'aanta iyo ka raali noqoshada ku xadgudubka sharciga, Barnaamijka Ku Dhaqanka ee Apogee ama Qawaaniita Shirkadda waxay kuu horseedi karaan tallaaboyin anshaxa la xirriira oo ka mid noqon kara shaqo ka joojin.

Tilmaan-bixinada dheeriga ah ee taleefoonada laga soo waco Baraasil

Haddii aad doonaysid in aad ka soo wacdid Baraasil taleefoonka bilaashka ah ee Khadka taleefoonka hab-dhaqameedka, waxaad u baahanaysaa in aad garaacdid koodka AT&T tooska ah ee Baraasil kadibna si deg-deg ah u garaac taleefoon lambarka Khadka Taleefoonka Hab-dhaqameedka ee Apogee sida hoos lagu muujiyay.

1. Khadka dibadda ah, ka oo garaac koodka tooska ah ee AT&T ee ku habbon Baraasil:
   a. 0-800-888-8288 – haddii aad ka soo wacaysid taleefoonka gacanta
   b. 0-800-890-0288 – haddii aad ka soo wacaysid taleefoon aan ahayn taleefoonka gacanta
2. Sug xariirinta kadibna garaac 800-441-6164.
3. Taleefoonka waxaa lagu jawaabayaa Af ingiriis. Si aad wicidaada taleefoonka aad ugu sii wadatid Af burtaqiis ama luuqad kale, fadlan u sheeq luuqadaada xiriiriyeha taleefoonka si aad u codsatid turjumaan. Waxaa laga yaabaa in ay qaadato dhawr daqiiqadood si uu khadka u soo galo turjumaan. Ha isa saarin taleefoonka.

Koodka tooska ah ee AT&T ee caalamiga ah waa la baddeli karaa. Haddii koodka tooska ah ee kor lagu xusay uusan adeega ku jirin, fadlan garaac koodka tooska ah ee AT&T baddelka ah ama booqo www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee) ee liiska koodadka hada la joogo ugu badan.

Sir xafididda iyo Ka hor-taga Aar-gudushada

Ilaa inta uu sharciga saamaxayo, shirkadda waxay ku dadaaleysaa inay qariso magacyada dadka soo sheega xadgudub jira ama la tuhunsanyahay in uu jiro oo ku saabsan jebinta sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo ee Apogee iyo Qawaaniinta Shirkadda ama ku saabsan hab-xisaabeed ama xisaab hubin shaki ku jiro ama qarsoodida qofka laga soo gudbiyay war-bixinta. Waxaa aasaasi ah in shaqaalaha ku lug leh baaritaanka iyo soo sheegista war-bixinta ay dhowraan ballan-qaadkan qarsoodida ah. Gebi ahaan waa mamnuuc in qof shaqaale ah kula kaco ciqaabid ama aargudasho qof kale oo shaqaale ah oo si daacad ah u soo sheegay hab-xisaabeed ama xisaab hubin shaki ku jiro.

Ciqaab Marinta Shaqalaha Ku Kaca Xadgudub

Markii la ogaado in qof shaqaalaha ahi ku kacay xadgudub la xiriira sharciga, Barnaamijka Lagu Dhaqmo Ee Apogee ama Qawaaniinta Shirkadda ama uu ka qeyb qaatay hab-xisaabeed ama xisaab hubin aan hagaasaneyn, qofkas shaqalaha ah waxaa lagu qadayaa ciqaab marin oo ay ku jiri karto in shaqada laga eryo. Waxaa intaa dheer, in shirkadda ay xaq u leedahay inay maxkamad la tiigsato shaqaale xadgudbay iyo weliba in ay u gudbiso arimaha hay'adaha sharciga iyo nidaaminta si ay tallaabo ugu qaadaan. Tallabo anshaxa ah ayaa sidoo kale laga qaadayaa horjoogeyaasha ama maamuleyaasha sare ee saamaxa, ogolaada ama tallaabo ku habboon ka qaadi waaya sharci darro, anshax xumo iyo akhlaaq kale oo aan habbooneyn. Waa xeerka shirkadda u degsan in loo meel mariyo anshaxyadeeda si isku mid ahna loo qaado; Hase yeeshee, qaabka anshaxa ee habboon wuxuu yeelanayaa qaddiyad gaar ah.

Gunaanad

Shirkadda waxay ballan qaaday in ay howleheeda ganacsi u fuliso si akhlaaqeed oo hab-dhaqan daacad ah leh iyo qaab sharciyada iyo xeerarka waafaqsan. Tusmadan waxaa loola jeedaa in ay kugu caawiso sifiican u fahmidda sidii aad ugu dhaqmi lehayd sharciga iyo mabadiida akhlaaqeed ee Apogee ee lagaa rabo. Ugu dambayntii, hase yeshee, adiga ayey ku jirtaa in aad maskaxdaada adeegsato oo aad go'aan satid in aad qaadid tallaabada ugu saxan. Xusuusnow mar kasta inaad adeegsato maskaxdaada iyo caqliga wanaagsan.

Somali translation
Taariikh: Agoosto 2011
Dib u daabicida: 12
©Apogee Enterprises, Inc., 2011